



FACT SHEET

15TH AVE S AND S COLUMBIAN WAY INTERSECTION IMPROVEMENTS

March 2017

RAADRAACA MASHRUUCA

Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT) waxaa ay dayactir ku sameyn doontaa Isgoyska 15th Ave S iyo S Columbian Way si ay u wanaajiso/hagaajiso ammaanka dadka ku lugeeya iyo kuwa baaskiilka ku wata agagaarka isgoyskan ee Beacon Hill. Hadda, dadka ku lugeeya iyo kuwa baaskiilka ku wata, oo ay ka mid yihiin ardayda dhigata dugsiga dhexe ee Mercer Middle School, waa in ay la tartamaan marinnada jahwareerka leh si ay isaga kala gudbaan waddada dhinacyadeeda waxaana dhici karta in ay gudbaan jiddadka saddex jeer. Isgoyska ayaa sidoo kale waxaa ku jahwareeri kara dadka gawaarida wata.

Sanadkii 2016, mashruuca dayactirka Isgoyska 15th Ave S and S Columbian Way waxaa uu ahaa mid ka mid ah 12ka ay xusheen Guddigga Kormeerka ee Levy to Move Seattle ee la maalgeliyo iyada oo loo marayo barnaamijka Sanduuqa Jiddadka Xaafadda (NSF) ee SDOT. Barnaamijka NSF waxaa uu maalgeliyaa mashaariicda ay codsadeen bulshada.

CANAASIIRTA MASHRUUCA

- Kaabiyo ku teedsan jidka oo cusub
- Midaynta/iswaafajinta seenyaalaha iyo isgoyska
- Xaddidyada leexadka ee 15th Ave S and S Oregon St; darawallada waxaa ay keliya awoodayaan in ay u leexdaan dhanka midig iyada oo la galayo ama laga soo baxayo wadada S Oregon St ee ka imaanaysa 15th Ave S
- Meel bannaan caam ah/guud oo cusub oo ku taalla geesaska waqooyi-galbeed iyo koonfur-galbeed ee isgoyska dib loo habeeyay
- Isku-xirro la hagaajiyay oo ku xiran tas-hiilaadka baaskiilka ee dhanka waqooyi, galbeed iyo koonfur


DHEEFAHA MASHRUUCA

- Ammaanka isgoyska ee ardayda iyo dadka kale ee lugeeya iyo kuwa baaskiilada wata oo korodha
- Yaraanshaha jahwareerka darawallada adeegsada isgoyska
- Joogsiyada gaadiidka oo hagaagsan
- Meel bannaan ee caam ah/guud oo cusub oo ay bulshadu ku raaxaysan karto



“Jasiirad” yar oo lagu lugeeyo ayaa ku taalla bartamaha wadada 15th Ave S and S Columbian Way, oo u dhow meesha ay maraan gawaaridda xawaaraha sare ku soconaya.

GOOBTA MASHRUUCA



MASHAARIICDA LA XIRIIRA

Waxaa jira tiro dayactirro ah oo lagu sameeyay degaankan, oo ay ka mid yihiin:

- Dhabe xaaridda qayb ka mid ah wadada S Columbian Way sanadka 2018
- Tixgelinta haddii aan hagaajin karno xiriirka baaskiilka ee ku teedsan waddada S Columbian Way ee u dhaxeysa isgoyskan iyo Beacon Ave S, halka mashruuca dhabe xaaridda uu ka dhacayo
- Abuuridda xiriir qoys saaxiibtinimo leh (jidka cagaaran ee xaafadda) ee u dhaxeeya Beacon Hill iyo xaafadda Mt Baker Iimayl noogu soo dir (hoos) hadaad rabto macluumaad badan oo ku saabsan mashaariicdan!

MACLUUMAADKA IYO XIRIIRKA MASHRUUCA


www.seattle.gov/transportation/NSF15andColumbian.htm
NSF15andColumbian@seattle.gov | (206) 733-9361
NSF Outreach Lead: Natalie Graves



Seattle
Department of
Transportation



IKHTIYAARKA NAQSHADDA HORE



WAXAAN DOONAYNAA IN AAN MAQALNO RA'YIGAAGA!

limayl noogu soo dir si aad noo ogeysiiso:

- Waa maxay waayo-aragnimada aad u leedahay isgoyska?
- Loogu talagalay meesha bannaan ee guud/caamka ah ee la naqshadeyn doono:
 - Sideed u jeceshahay in aad u adeegsato meesha bannaan ee cusub?
 - Waa maxay muuqaallada aad jeclaan lahayn in aad halkan ku aragto? Meelo la fadhiisto? Meelo lagu ciyaari? Meelo loogu talagalay fanka ama dhirta?



Tusaalaha meel bannaan ee guud/caam ah oo ku taalla Bell St, magaalada hoose

JADWALKA

2016	2017	2018	2019
Dalabyada barnaamijka NSF iyo doorashada mashruuca			
	Nakhshada mashruuca		
		Mashruuca dhismaha	
			Dalabyada barnaamijka NSF iyo doorashada mashruuca (wareeg cusub)

MAALGELINTA

Maalgelinta waxaa ay ka imaanaysaa Levy to Move Seattle ee sagaalka sano, ee ay ansixiyeen cod-bixiyeyaasha 2015, kaas oo wanaajin/hagaajin doona ammaanka dhammaan dadka musaafiriinta/safarka ah, ilaalinaya waddooyinka iyo buundooyinka, oo wuxuu maalgelinayaa ikhtiyaaro socdaal la awoodi karo, oo lagu kalsoonaan karo oo loogu talagalay magaalooyinka sii koroya. Levy waxaa ka mid ah \$24 oo lagu sii-wadayo barnaamijka Sanduuqa Waddada Xaafadda muddada sagaalka sano.

Mashruucan ayaa sidoo kale maalgelin ka helaya Barnaamijka Waddooyinka Ammaanka ah ee Dugsiga ee SDOT, kaas oo ka dhigaya mid fudud o ammaan u ah ardayda in ay ku lugeeyaan oo baaskiil ku wataan Seattle.

SII-WAD IN AAD KU LUG YEELATO!

Waxaa naga go'an in aan kugu wargelinno inta uu socdo mashruuca. Xor u ahaaw in aad nala soo xiriirto, waxaadka raadisaa macluumaad badan

Isdiiwaangeli si aad u hesho iimaylka wararkii ugu dambeeyay:
NSF15andColumbian@seattle.gov

MACLUUMAADKA IYO XIRIRKA MASHRUUCA

www.seattle.gov/transportation/NSF15andColumbian.htm
 NSF15andColumbian@seattle.gov | (206) 733-9361
 NSF OutreachLead: Natalie Graves



Seattle
 Department of
 Transportation

The Levy to
MOVE SEATTLE

